جمهورية مصر العربية	6 جمادى الأولى 1443هـ
وزارة الأوقاف	10 ديسمبر 2021م



# Ka hortagga musuqmaasuqa waa mas'uuliyad diimeed iyo mid qaran iyo mid bulsho

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

{وَلا تَبْغِ الْفَسَادَ فِي الْأَرْضِ إِنَّ اللَّهَ لا يُحِبُّ الْمُفْسِدِينَ}

**(Hana La doonin Fasaad Dhulka, Eebe ma Jecla Fasaadiyaashee)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Musuqmaasuqa waa ifafaale xun oo burburiya awoodda dadka iyo midda dowladaha, wuxuu caqabo ku yahay dhismaha iyo kobcinta; sidaa awgeed shareecooyinka samada waxay isku raacsan yihiin in musuqmaasuqa layskaga digo qaab kaste uu yahay; wuxuu leeyahay Alle (SW) asoo kasoo guurinaya sayidkeena Saalix (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

{وَلَا تَعْثَوْا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ}،

**(hana xumaynina dhulka idinkoo fasaadinaya)**

Sidoo kale asoo kasoo guurinaya sayidkeena Shucayb (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

{وَلَا تَبْخَسُوا النَّاسَ أَشْيَاءَهُمْ وَلَا تَعْثَوْا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ}،

**(Hana ka nusqaaminina dadka waxooda hana xumaynina dhulka idinkoo fasaadinaya)**

Wuxuu leeyahay Alle asoo kasoo guurinaya sayidkeena Muuse markuu la hadlayay walaalkiisa Haaruun (nabadgalyo korkooda ha ahaatee):

{وَأَصْلِحْ وَلَا تَتَّبِعْ سَبِيلَ الْمُفْسِدِينَ}،

**(Wanaaji hana raacin Jidka Mufsidiinta),** wuxuu leeyahay Alle (SW):

{وَلا تَعْثَوْا فِي الأَرْضِ مُفْسِدِينَ}،

(**hana xumaynina dhulka idinkoo fasaadinaya**)

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(فَأَمَّا مَنِ ابْتَغَى وَجْهَ اللهِ، وَأَطَاعَ الْإِمَامَ، وَأَنْفَقَ الْكَرِيمَةَ، وَيَاسَرَ الشَّرِيكَ، وَاجْتَنَبَ الْفَسَادَ، فَإِنَّ نَوْمَهُ وَنُبْهَهُ أَجْرٌ كُلُّهُ)

**(qofkii Alle wejigiisa doona oo adeeca imaamka, oo bixiya hanti wanaagsan wadaagahana si fudud kula dhaqma kana fogaada fasahaadka hurdadiisa iyo soo jeedkiisa dhamaan waa ajir)**

Fasahaadka qaabab badan ayuu leeyahay, waxaa ugu daran waxa la xiriira qaladaadka hantida khuseeya iyo kuwa maamulka la xiriira, marka hantida guud lagu xadgudbayo, lagana gaabinayo gudashada waajibaadka shaqada, iyo musuqmaasuqa, iyo laaluushka, iyo khiyaanada, dhamaan waa cunitaanka booliga, iyo in dadka hantidooda baadil lagu cuno, wuxuu leeyahay Alle (caza wa jalla):

**{وَلَا تَأْكُلُوا أَمْوَالَكُمْ بَيْنَكُمْ بِالْبَاطِلِ}**

**(Hana ku cunina xoolihiinna dhexdiinna si baadil ah)**

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha haatee):

**(لعنةُ اللهِ على الرّاشِي والمُرْتَشِي)،**

**(Lacnadda Alle ha ku dhacdo kan laaluushka bixiya iyo kan qaata)** wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha haatee):

**(إِنَّ رِجَالًا يَتَخَوَّضُونَ فِي مَالِ اللهِ بِغَيْرِ حَقٍّ ، فَلَهُمُ النَّارُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ)،**

(**Niman ugu dhex tiinbada hantida Alle si xaqdarro ah naar ayaa u sugnaatay**) wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha haatee):

**(لَا يَدْخُلُ الْجَنَّةَ لَحْمٌ نَبَتَ مِنْ سُحْتٍ، النَّارُ أَوْلَى بِهِ)،**

**(Jannada ma galo hilib booli ka dhashay, naarta ayaa ku habboon)**

wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha haatee):

**(مَنْ غَشَّنَا فَلَيْسَ مِنَّا).**

**(qofkii na siro naga mid ma aha)**

Waxaan shaki ka taagnayn in laga hortago fasahaadka ay tahay mas'uuliyad diimeed iyo mid qaran iyo mid bulsho, mas'uuliyadda diimeedka waxay kasoo bilaabanaysaa hagaajinta nafta, iyo in lagu tarbiyeeyo cabsida Alle iyo iska ilaalintiisa xiliga qarsoonaanta iyo xiliga muuqashadaba, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَهُوَ مَعَكُمْ أَيْنَ مَا كُنتُمْ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ}**

**(Eebana waa idinla joogaa meelkastood ku sugan tihiinba, waxaad camal falaysaanna Eebe waa arkaa)**

Wuxuu leeyahay (caza wa jalla):

**{إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ رَقِيبًا}**

**(Eebana wuxuu u Yahay Korkiina Ilaaliye)**

Sidoo kale waxay keenaysaa inay ku abuurto nafta qiyamka runta iyo amaanada iyo oofinta, iwm. Ee ka mid ah qiyamka wanaagsan, mu'minka dhabta ah waa hagaajiye ee ma aha fasahaadiye, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{أَمْ نَجْعَلُ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ كَالْمُفْسِدِينَ فِي الْأَرْضِ أَمْ نَجْعَلُ الْمُتَّقِينَ كَالْفُجَّارِ}.**

**(Miyaan ka yeeleynaa kuwii xaqa rumeeyey oo camal fiican falay sida kuwa hallayn dhulka, mise waxaan kala mid dhigaynaa kuwa dhowrsada kuwa xun oo kale (Gaalada))**

Mas'uuliyadda wadaniga waxay keenaysaa in la xoojiyo qiyamka jacaylka iyo sheegashada dalka, iyo dareenka mas'uuliyadda la adkeeyo xagga hantida guud iyo adeegyada guud, iyo in loo faafiyo dhaqanka hufnaanta iyo daacadnimada qaab bulsheed oo ballaaran, iyo in layska qabto fasahaadiyeyaasha iyo kuwa wax halleeya, Alle (SW) wuxuu ugu gooddiyay fasahaadiyeyaasha cadaabka ugu daran, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{إِنَّمَا جَزَاءُ الَّذِينَ يُحَارِبُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيَسْعَوْنَ فِي الْأَرْضِ فَسَادًا أَن يُقَتَّلُوا أَوْ يُصَلَّبُوا أَوْ تُقَطَّعَ أَيْدِيهِمْ وَأَرْجُلُهُم مِّنْ خِلَافٍ أَوْ يُنفَوْا مِنَ الْأَرْضِ ذَٰلِكَ لَهُمْ خِزْيٌ فِي الدُّنْيَا وَلَهُمْ فِي الْآخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ}.**

**(Abaalka kuwa la Dagaalama Eebe iyo Rasuulkiisa oo la Socda Dhulka Fasaad waa in la Dilo ama la Waro, ama loo gooyo Gacmahooda iyo Lugahooda Isdhaaf, ama laga Fogeeyo Dhulka, arrintoodaasna waa inay Mudan yihiin Dulli Adduun iyo Aakhiro oo Cadaab Wayna)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan ugu sharafta badan khalqiga sayidkeena Muxammad isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Mas'uuliyadda bulshada waxay keenaysaa in la xoojiyo dhaqanka guud ee diidaya fasahaadka, iyo in la keeno ilaalo bulshadeeda oo fahansan halista uu u keenayo fasahaadka bulshada dhammaan, taasna waxaa loo soo marayaa falgalinta hay'adaha diiniga iyo kuwa waxbarashada, iyo kuwa warbaahinta, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{فَلَوْلا كَانَ مِنَ الْقُرُونِ مِن قَبْلِكُمْ أُوْلُوا بَقِيَّةٍ يَنْهَوْنَ عَنِ الْفَسَادِ فِي الأَرْضِ إِلَّا قَلِيلًا مِّمَّنْ أَنجَيْنَا مِنْهُمْ}**

**(maxay u ahaan waayeen Quruumihii hore dad khayr (caqli) leh oo ka reeba fasaadka dhulka, wax yar mooyee oo ka mida kuwaan korinnay xaggooda)**

Wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَمَا كَانَ رَبُّكَ لِيُهْلِكَ القُرَى بِظُلْمٍ وَأَهْلُهَا مُصْلِحُونَ}.**

**(Eebana uma halaago magaalo dulmi iyadoo Ehelkeedu wax wanaajin)**

Sidoo kale arrinta waxay keenaysaa inaan la qarqarinin fasahaadiye kaste, iyo in lala shaqeeyo mu'asasooyinka ku howlan dabagalka dhammaan noocyada fasahaadka, ilaa xasillooni bulshada dhammaanteeda ay ka hesho, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha haatee):

**(مَثَلُ الْقَائِمِ عَلَى حُدُودِ اللَّهِ وَالْوَاقِعِ فِيهَا كَمَثَلِ قَوْمٍ اسْتَهَمُوا عَلَى سَفِينَةٍ فَأَصَابَ بَعْضُهُمْ أَعْلَاهَا وَبَعْضُهُمْ أَسْفَلَهَا فَكَانَ الَّذِينَ فِي أَسْفَلِهَا إِذَا اسْتَقَوْا مِنْ الْمَاءِ مَرُّوا**

**عَلَى مَنْ فَوْقَهُمْ فَقَالُوا لَوْ أَنَّا خَرَقْنَا فِي نَصِيبِنَا خَرْقًا وَلَمْ نُؤْذِ مَنْ فَوْقَنَا فَإِنْ يَتْرُكُوهُمْ وَمَا أَرَادُوا هَلَكُوا جَمِيعًا وَإِنْ أَخَذُوا عَلَى أَيْدِيهِمْ نَجَوْا وَنَجَوْا جَمِيعًا).**

**(Tusaalaha kan ku taagan xuduudda Alle iyo kan ku dhacaya waa sida dad doon qorituur u sameytay, qaar korkeeda ayay heleen qaarna hoosteeda, kuwa hoos markay biyo dhaansanayaan waxay marayaan kuwa ka korreeya, waxay dhaheen: haddaan duleelino qeybteena oo aanan dhibin dadka naga korreeya, hadday u daayaan wixii ay rabaan way wada halaagsamayaan, hadday gacmaha ka qabtaanna way wada badbaadayaan)**

**Ilaahayow ka ilaali Masar xumaan kaste iyo dhammaan dalalka caalamka**